

# Warqadda Nuqulka ee Minnesota Department of Health

## Daweynta Jeermiska Cudurka Qaaxada (TB) ee Qarsoon

### Daweynta Jeermiska Cudurka Qaaxada (TB) ee Qarsoon?

Baaritaankaaga wuxuu sheegaya in aad qabtid cudurka qaaxada (TB) qarsoon (latent), ama "LTBI." Tiro yar oo jeermiska cudurka qaaxada (TB) ayaa ku faafay qaybo badan ee jirkaaga ka mid ah sida, sambabadaada, lafahaaga, ama keliyahaaga.

Jeermiska cudurka qaaxada (TB) waxba ku yeeleyn maayo haatan. Jeermiska cudurka waxay yihiin kuwo "jiifa" laakiin weli waa ay nool yihiin. Jeermiska cudurka qaaxada (TB) waa mid ku "qarsoonaan" doono inta uu jirkaaga uu la dagaalamayo cudurka. Marka aad qabtid cudurka qaaxada LTBI ma ku faafin kartid cudurka qaaxada (TB) dadka kale.

Haddii uu joojiyo jirkaaga la dagaalanka jeermiska cudurka qaaxada (TB), way soo "laba kaclayn" doonaan waxayna bilaabayaan in ay koraan. **Arrintani waqtii kasta ayeey ku dhici kartaa qof kasta oo qaba LTBI.** Marka jeermiska uu koro uuna faafu waxaa lagu magacaabaa "cudurka qaaxada (TB) ee firfircoo." Dadka qaba cudurka qaaxada (TB) ee firfircoo aad bay u xanuunsan karaan wayna ku faafi karaan cudurka qaaxada (TB) dadka kale.


### Sidee baan uga hortagi kara cudurka qaaxada (TB) ee firfircoon?

Waxa jiraa dawo aad u qaadan kartid ka hortagaa ku dhicida cudurka qaaxada (TB) ee firfircoo. Dawada Isonixed (INH) waxa weye dawo caadi ah oo loo isticmaalo daweynta LTBI. Dawada INH waxay dilaysa jeermiska cudurka qaaxada (TB) ee "waxyelada lahayn" **ka hor** inta cudurka kugu soo xoogaysan. Sababta waxa weye jeermiska cudurka qaaxada (TB) waa mid xoog leh, billooyin badan ayeey qaadanaysa in dawada ay disho cudurka.

Dawada INH aad bay u shaqeynayasa haddii aad qaadatid maalin kasta ilaa uu dhakhtarkaaga u yiraahdo WAY FIICAN TAHAY in aad joojisid. Dawadaada INH cunto la'aan qaado.

Waa in aad aragtaa dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka bishiiba mar inta aad qaadanayso dawada INH, si loo hubiyo daweyntaada in ay sii wanaagsan u socoto.

### Maxaan dawada u qaadanaya haddii aanan dareensanayn in aan xanuunsanahay?



Dawada INH waxay dilaysa jeermiska cudurka qaaxada (TB) ee jirkaaga ku jira **ka hor** inta ayna helin fursada ay "ku xoogoobaan" ayna xanuun kugu ridin. Xusuusnow. Jeermiska cudurka qaaxada (TB) way fududahay in la dilo inta weli uu "xoogaysan."

### Maxaan u baahanahay in aan wax ka ogaado daawada LTBI?

Dad badan ayaa qaadanayaan INH maalin kasta dhibaato la'aan ah, **laakiin waxaa jira waxyaabo yar yar ee loo baahan yahay in aad ilaalisid:**

- Qandho ka badan saddex maalmood
- Rabitaan la'aan cunada, culayska oo kaa lumo, ama dareemid daal sabab la'aan ah
- Lallabo ama hunqaacid:

Dadka qaar waxay qabaan lallabo yar marka **bilaabayaan** qaadashada kaniiniga INH. Haddii arrintani ay kugu dhacdo, waxaad isku dayda in aad kula cuntid cunto **yar** kaniinigaaga ama qaado kaniiniga marka aad seexanaysid. **Haddii aad weli lallaboonyisid saddex maalmood ka dib, waxaad sii toos u wacdaa isbitaalkaaga.**

- Xudunta oo ku xanuunta
- Kaadida oo ku madowaata (midabka shaaha ama qaxwaha)
- Nabarrada maqaarka ama cun-cunka Maqaarka oo yeeshaa midabka hurudka ama indhaha
- Nabaro ka soo baxa maqaarka ama is-xoqid
- Kowaabiyo iyo qarar oo aad ka dareemaysid gacmahaaga ama cagaha
- Qufac ka badan saddex usbuuc
- Habeenkii oo aad dhidid

**Haddii aad qabtid dhibaato kasta oo kuwani ka mid ah, waxaad si toos u wacdaa isbitaalkaaga – ballanta ku xigta ha sugin.**

### Waxyabo kale oo muhiim ah:

- **Cabitaanka Aalkolada** inta aad dawada INH qaadanaysid cabitaanka aalkolada beerkaaga ayey wax u dhimi karta. Ha cabin aalkolada biirta ah, khamrada waayinka loo yaqaano, ama wax khamri ah ilaa aad ka dhamaysid daweyntaada cudurka LTBI.
- Waxaad hubisaa in aad u sheegtid dhakhtarkaaga haddii aad **dawo kasta kale** aad qaadanaysid ama haddii aad tahay ruux **uur leh**.



## Daweynta Jeermiska Cudurka Qaaxada (TB) ee Qarsoon - bogga 2

### Maxaa dhacaya haddii aan qaadanin dawada?

Haddii aadan qaadanin dawada INH ama haddii aad goor horey u joojisid qaadashada dawada, waxay kugu dhici karaa cudurka qaaxada (TB) ee firfircoo.

Arrintani waxa ku dhici kartaa **qof kasta ee waqtii kasta**. Ha sugin arrintani in ay kugu dhacdo adiga ama qoyskaagaba!

### Maxaan sameeya haddii aan qaatay tallaalka BCG?

Wadamada caadiga u ah cudurka qaaxada (TB), dad badan ayaa qaata tallaalka loo yaqaano BCG. Tallaalka BCG wuxuu caruurta ka ilaali karaa cudurka qaaxada (TB), laakiin arrintani waxay ka ilaalin karta keliya sanooyin yar.

Dadka horey u qaatay tallaalka BCG way ku dhici karaan cudurka qaaxada (TB) ee firfircoo! Haddii aad horey u qabtay tallaalka BCG, weli nafsadaada waad ilaali kartaa adiga oo qaadanay dawada lagu daweeyo cudurka LTBI.

### Maxaa dhacaya haddii aanu awoodin in aanan iska bixiyo kharashka kaniiniga?

Waxaad weydiisaa dhakhtarkaaga ama kal-kaaliyahaaha waxa ku saabsan helitaanka dawada cudurka qaaxada oo lacag la'aan ah oo ay bixiso Waaxda Caafimaadka Minnesota.

### Maxaa dhacaya haddii aan guuro?

Haddii aad u guurtid gobol kale ama magaalo kale, waxaad u sheegta dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadka **ka hor intaadan guurin**. Waxay kaa caawin karaan in ay hubiyaan si aad u heshid dawadaaada cudurka qaaxada (TB) ka dib marka aad guurtid.

**Waxaad cudurka qaaxada (TB) ka badbaadisaan nafsadaada, qoyskaaga, iyo asaxaabtaada, Waxaad qaadataa dhammaan dawadaada ee cudurka qaaxada (TB)!**

### Sidee baan u xasuusanaya in aan qaato dawadeyda cudurka qaaxada (TB)?

**Waa muhiim in aad qaadatid dawadaada INH maalin kasta.** Haddii aadan qaadan weyso dawada maalmo badan waxaa laga yaabaa in dawada ay shaqeynin. Si qaado dawada ilaa uu dhakhtarkaaga uu ku yiraahdo way wanaagsantahay in aad dawada joojisid.

Qaar ka mid ah hababka lagugu caawin karo in aad xusuusatid dawada:

- Dawadaada waxaad dhigtaa meel aad arki kartid maalin kasta.
- Waxaad weydiisaa qof qoyska ka tirsan ama saaxiib in uu ku xusuusiiyo dawada maalin kasta.
- Waxaad calaameysataa buugaaga taariikhda ku qoran maalin kasta kaddib marka aad dawada qaadatid.
- Waxaad isticmaashaa sanduuq aad ku xusuusatid dawada.
- Waxaad dawadaada qaadata isla waqtigii maalin kasta. Tusaale ahaan, kaddib marka aad rumaysatid, kaddib marka aad quraacatid, ama ka hor intaadan seexanin.

Haddii aad maalin geftid, qoro si aad dhakhtarkaaga ama kalkaalisada ugu sheegtid baaritaanka caafimaadkaaga ee xiga.

### Iubitsalkaaga/dhakhtar/kal-kaaliye:

---



---

Taleefoon #: \_\_\_\_\_



Tuberculosis Prevention and Control Program  
P.O. Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-5414  
1-877-676-5414  
[www.health.state.mn.us/tb](http://www.health.state.mn.us/tb)